



Nin ayaa bidixda ku cunay Rasuulka agtiisa-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, wuxuu Rasuulku scw ku yiri: "midigtaada ku cun", wuxuuse yiri: ma awoodo, wuxuu Rasuulku scw yiri: " ha awoodin

Salama Binu Alakwac-Allaha ka raali ahaadee-: Nin ayaa bidixda ku cunay Rasuulka agtiisa-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, wuxuu Rasuulku scw ku yiri: "midigtaada ku cun", wuxuuse yiri: ma awoodo, wuxuu Rasuulku scw yiri: " ha awoodin", kibir baa u diiday, wuxuu yiri: mar danbe gacantiisii afkiisa uma qaadin, .

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabiga ayaa arkay-naxariis iyo nabadi korkiisa aha ahaatee-nin bidixda wax ku cunaaya, wuxuuna amray inuu midigtiisa ku cuno, Wuxuu ku jawaabay inuusan awoodin isagoo ay kibir iyo been ka tahay! Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ku habaaray inuu kari waayo midigta inuu wax ku cuno. Ilaahayna wuu aqbalay habaarkii Nabigiisa oo waxaa qalashay midigtiisii, mana awoodin inuu afkiisa gaarsiiyo intaa ka dib cunto iyo cabitaanba.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3372>

